# Waxbarista u diyaarinta ah

Helsinki

# Waa maxay koox ahaantu waxbarista u diyaarinta ah

### Waxbarista loogu diyaarinayo qofka waxbarashada asaasiga ah waxaa ku gudajira iyo qaabka loo hirgalinayo

Waxbarista u diyaarinta ah waxaa loogu talo galay carruurta 6-17 sano da'doodu u dhaxayso ee aanan wali in ku filan aqoonin af-finishka si ay ugu dhigtaan waxbarashada asaasiga ah.

Waxbarista diyaarinta ah waxaa loo hirgaliyaa qaabab kala duwan. Ilmaha da'diisa ayaa xukumaysa waxbarashada uu ka qaybqaadanayo nooca ay noqonayso. Waxbaristu waxaa weeyaan 24-26 saacadood todobaadkii. Waxbaristu waxaay ku sallaysantahay qorshe waxbarasho oo gaar u ah u diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah.

Waxbarista u diyaarinta ah waxaa la dhigan karaa ugu badnaan hal sano. Waxbarista u diyaarinta ah waxaa suuro gal ah inaay ka hor ardayga ka dhamaato haddii ay suuro gal u tahay in uu la socdo waxbarista af finishka ku baxaysa. Macallinka ayaa qiimeynaya aqoonta ilmaha.

### Waxbarista u diyaarinta ah ee ku socota 9-17 sano jirka

Fasalka saddexaad laga soo bilaabo ardayda waxbarista u diyaarinta ah qaadanayaa waxaay wax ku baranayaan kooxo waxbarasho oo gaar u ah tukhasus gaar u ah wabarista u diyaarinta. Kooxaha wabarista u diyaarinta ah waxaa ku jira arday xaalado kala duwan ka kala yimidday. Kooxaha waxaa ku jira arday da'ahoodu kala duwanyihiin oo ah 9-12 sano jir ama 12-15 sano jir.

### Barnaamijka wax barashada

Arday kasta oo waxbarista u diyaarinta ah qaadanaya waxaa loo samaynayaa barnaamij waxbarasho oo gaar u ah. Barnaamijka waxbarashada waxaa lagu sheegayaa ardayga taariikhtiisii waxbarasho, awoodihiisa, waxyaabaha uu la tacaalayo, hiigsiyadiisa shaqsiga ah, maadooyinka uu dhiganayo iyo saacadaha waxbarashada iyo qaabka waxbarashada loo qabanqaabiyay. Barnaamijka waxbarashada waxaa si wada jir ah u samaynaya ardayga, waalidka iyo macalinka.

### Luqadda finishka

Waxbarashada waxaa xooga loo saarayaa barashada luqadda finishka. Waxaa la hiigsanayaa in la dhiso aqoonta luqadda ee salka ah ee kobcaysa.

- Ardaygu wuu ka soo baxaa xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka ku soo noqnoqda ee u baahan isticmaalka luqadda.
- Ardaygu wuu awoodaa in uu magacaabo waxyaalaha aanan ku cusbayn, wuu kala soo dhex bixi karaa luqadda hadalka ah iyo ta qoranba erayo iyo weedho uu yaqaano.
- Ardaygu wuu fahmayaa hadalka si deggan loo sheego haddii loo baahdana loogu soo celiyay hagitaanada kooban iyo mowduucyada aanan ku cusbayn.
- Ardaygu wuu fahmayaa luqadda xaaladda waxbarista loo isticmaalayo iyo qoraalka ku qoran buugga wax lagu dhiganayo isaga oo sawiradda ku yaalla iyo erayada qoraalka nuxur u ah ee uu fahmayo isku geygeysanaya.
- Ardaygu wuxuu qorayaa erayo uu hore u yaqaanay iyo weedho gaaban.

Aqoonta luqadda salka ah ee kobcaysa micnaheedu waxaa weeyaan in uu ardaygu wali u baahanyahay taageero badan.

- Ardaygu wuxuu u baahanyahay tusaalayn badan iyo eraybixino diyaarsan si uu u soo saaro hadal isdaba joog ah oo kooban ama qoraal kooban.
- Ardaygu wuxuu wali u baahanyahay caawimaad luqaddiisa ah si uu u fahmo waxyaabaha ku cusub.
- Ardaygu wuxuu u baahanyahay in in badan loo qaabeeyo oo sawiro lagu kabo iyo in si deggan oo faseex ah hadalka loogu dhigo, in loogu celceliyo iyo in loo turjumo.

Luqadda finishka waxaa dheer waxbarashada kooxaha u diyaarinta waxaa lagu dhiganayaa maadooyinka kale ee dugsiga dhexe. Badanaa waxaa la dhigtaa xisaab, qaybo ka mida maaddada bayoolojiiga, juqraafiga, fisiigiska, kemesiriiga, tariikhda, farshaxanka, muusigga, isboortiska iyo farsamada gacanta. Macallinka ayaa dooranaya maadooyinka la dhiganayo waxyaabaha laga qaadanayo isaga oo ku sallaynaya awoodaha kooxaha kala duwan iyo baahiyadooda.

Waxbarista guud waxaa dheer in luqadda finishka si kasta oo suuro gal ah waxqabadka loogu soo saaro. Macallinka ayaa erayaynaya waxqabadka nololmaalmeedka iyo wadadhaqanka wuxuuna u isticmaalayaa waxbarista sawiro uu fahamka ku fududaynayo iyo waxyaabo kale oo uu ku suurayn karo waxaa uu dhigayo. Ardayga waxaa lagu dhiiri galinayaa in uu isaga oo dhiiran isticmaalo luqadda finishka.

## Ka qaybgalinta

Muddada lagu jiro waxbarista u diyaarinta ahba waxaay ardaydu kolba sida ay awooddoodu tahay iyada oo loo eegayo ka qaybqaadanayaan fasalka luqadda finishka lagu dhiganayo. Xiisadahan ka qaybgalinta ah waxaa badanaa laga bilaabayaa maadooyinka sida isboortiska iyo muusigga ah. Ardayda qaarkood ayaa tusaale ahaan ka qaybqaadanaya xisaabta amaba maaddada aqoonta soonaha ah.

Ardayga waxbarashadiisii hore ama heerka aqoontiisa yadoo loogu salaynayo waxaa looga faa'idayn karaa aqoontiisa hore isaga oo laga kabayo waxaa ku cusub in aqoontisa kor loogu qaado isaga oo isla markaasna la dhiganaya ardayda qeyrkiisa ah ee luqadda finishka ku dhiganaya.

## Afka hooyo

Ardaygu wuxuu helayaa waxbaris u diyarin ah oo luqaddiisa hooyo ku baxaysa oo labo saacadood isbuucii ah. Khasab ma aha in waxbarista luqadda hooyo qofka lagu siiyo isla iskoolka uu waxbarashadiisa kale ku qaadanayo.

## Qiimeynta

Marka waxbarista u diyaarintu ay dhammaan rabto waxaa ardayga waxbarashadiisa lagu qiimeynayaa barnaamijka waxbarashada. Qiimeyntu waa mid hadal ahaan loo siinayo. Qiimeynta waxaa awoodda la saarayaa in la qiimeeyo in uu ardeygu gaadhay hiigsiyada isaga loo dajjiyay. Waxaa suuro gal ah in la isticmaalo qalabyo kale oo iskoolku gaar u leeyahay oo qiimeynta dhexe ama qiimeynta ardaygu isagu isku samaynayo loo isticmaalo.

Ardayga shahaado ayaa laga siinayaa ka qaybgalka waxbarista u diyaarinta ah.

## Waxa ka dambeeya waxbarista u diyaarinta ah

Marka ay waxbarista u diyaarinta ah dhamaato ardaygu wuxuu u wareegayaa waxbarista aasaasiga ah. Ardaygu wuxuu u wareegayaa iskoolka isaga u dhow haddii waxbarista u diyaarinta ah goob kale ay uga socotay. Waxaa kale oo suuro gal ah in uu ardaygu codsado in uu ku sii wato waxbarashada isla iskoolka uu ka qaadanayay waxbarista u diyaarinta ah. Haddii iskoolka ay boosas bannaan jiraan waxaa maamulaha u suuro gal ah in uu arday iskool kale ahna qaato.

Waxbarista u diyaarinta dabadeed ardaygu wuxuu u wareegayaa da'diisa fasal ku habboon. Haddii ardaygu muddadii waxbarista diyaarinta uu ku jiray uunan gaadhin darajada waxbarashada ee salka u ah ama uu meelo kale aad uga liito waxaa u suuro gal ah in uu u wareego fasalka ka hooseeya da'diisa. Markaas waxaa wakhti loo siinayaa in luqadda finishku ay soo kobacdo intaanan loo bilaabin waxbarashada aasaasiga ah.